# KAABISTA DARYEELKA ILMAHA SHAQADA KU XIDHITAANKA

## *Bulshqada Ololaha ee*

Qoysas badan oo ku nool gobolka Washington waxay u qalmaan daryeelka ilmaha oo bilaash ah ama jaban, laakiin waxaa dhici karta inayna ka war haynin. Waxa aad ku caawin kartaa inaad la wadaagto macluumaadka waalidka, daryeelayaasha, iyo bulshooyinka.

Bushqadan waxaa kamid ah xog toos loo isticmaali karo oo diyaar ah-waraaqo daabacan, waxyaabo lasoo dhigo baraha bulshada, iyo shaqo iimeel oo fududayn kara in xogta la baahiyo. Hadii aad si toos ah ula shaqaynayso qoysaska ama aad doonayso inaad caawiso bulshada inay ka warqabto, khayraadkan waxa uu fududeeyaa in lagu xidho qoysaska taageerada ay u baahan yihiin.



## FARIIMO MUHIIM AH

**Qodobada ugu muhiimsan ee aanu doonayno in aanu wadaagto marka aanu ka hadlayno barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha.**

- Qoysas badan oo Washington ku sugan waxay u qalmaan daryeelka ilmaha oo bilaash ah ama jaban.
- Qoysaska ayaa heli kara kaalmo ay ugu dalbanayaan luuqado badan.
- Qoysaska ayaa eegi kara hadii ay u qalmaan oo waxay ku dalbanayaan onleyn ama taleefanka.
- Caymiska wada bixinta kaabista daryeelka ilmaha kama badna $165 bishii. Qoysaska qaar ayaan waxbaba bixin.



**Sida loo xayaysiiso barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha.**

- Ku wadaag macluumaadka jaanaladaada oo dhan adiga oo isticmaalaya bushqadan.
- Ku dar faahfaahinta kaabista daryeelka ilmaha websaytkaaga, wargeyskaaga, ama meelaha bulshada ka dhaxeeya.
- Isticmaal waraaqaha xogta, xogta baraha bulshada lasoo gelinayo iyo shaxda iimeelka ee lagu siiyay si aad u faafiso xogta.
- Ku dheji meel xogta daabacan meel la arki karo halka qoysasku ay arji karaan.
- La soco cida gacan saarka la leeyahay iyo hay'adaha si ay kaaga caawiso inaad faafiso xogtan.

**Xogta sida tooska loo isticmaalayo:**

Booqo **dcyf.wa.gov/childcare/toolkit** si aad usoo dejisato xogta. Xogta waxaa lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish, iyo Soomaali.

## KHAYRAADKA DAABACAN




**Kaabista Daryeelka Ilmaha - Daryeelka Ilmaha Bilaash ah ama Qiimo Jaban, WARAAQAHA XOGTA**

Waraaqo xog oo si fudud loo akhrin karo, loo qaadan karo guriga oo sharaxaya cida u qalanta iyo sida loo dalbado.

*Ku dalbo nuqulada daabacan onleyn ama laftaadu daabaco.*




**Kaabista Daryeelka Ilmaha - Daryeelka Ilmaha Bilaash ah ama Qiimo Jaban, WARAAQAHA DHEJISKA**

Waraaqo xog oo la fududeeyay, oo indhaha soo jiidanaya oo loogu talo geley meelaha dadka ka dhaxeeya. Ku haboon xarumaa daryeelka ilmaha, qolalka sugitaanka, laybareeriyada, iyo sabuurada xogta bulshada.



## KHAYRAADKA DHIJITAALKA AH

**Isticmaal fiidyawyadan iyo muuqaaladan oo lagu baahiyay baraha bulshada, iimeelada, wargeysyada, iyo websaytyada. Ama booqo jaanaalkeena baraha bulshada oo dib u wadaag wada aanu soo dhigno.**

- **www.facebook.com/wadcyf**
- **www.instagram.com/wadcyf**
- **https://x.com/waDCYF**
- **www.linkedin.com/company/washington-state-department-of-children-youth-and-families**




### Baadi Goobta Daryeelka Ilmaha Qiimaha Jaban

Ku baahi baraha bulshada fiidyawgan gaaban ee ka sheekeynaya Sophia, hooyo mashquul ah oo sadex caruur ah oo baraheeda bulshada ka baadhaysa daryeelka ilmaha oo qiimo jaban.




### Fiidyaw daryeelka ilmaha oo bilaash ah ama qiimo jaban

Baahi fiidyawgan oo muujinaya Sophia oo eegeysa sida ay u dalbanayso kaabista daryeelka ilmaha.




### Yaanay ku dhaafin muuqaalada baraha bulshadu.

Ku baahi barashada bulshada muuqaalada ee uga waramaya qoysaska daryeelka ilmaha bilaashka ah ama qiimaha jaban.




### Daryeelka ilmaha oo jaban ama bilaash ah waxa uu u fudud yahay sida 1, 2, 3

Ku baahi muuqaaladan taxanaha ah ee muujinaya sida fudud ee lagu heli karo daryeelka ilmaha ee bilaashka ah ama qiimaha jaban.




### Qoysaska degmadaada, taxanaha bartilmaameedka

Baahi muuqaaladan lagu bartilmaameedsanayo degmooyinka Yakima, Benton/Franklin, iyo Stevens.

## SHAXDA

Waxa aanu isku keeney shaxo ah taxane oo si fudud loogu wadaagi karo fariinta daryeelka ilmaha jaban ama bilaashka ah. Hadii aad soo dhigayso baraha bulshada, u dirayso wargeys, ama kala hadlayo qoysaska, qoraaladan si fudud ayaa loo isticmaali karaa oo waxaa lagu baahin karaa si dahkhso ah oo cad. Kaliye koobiyee, oo geli, oo wadaag!

### WARGEYSYADA

**Mawduuca/Cinwaanka:** Ma U Baahan tahay Kaalmo Bixinta Kharashka Daryeelka Ilmaha?

**Qaybta Dhexe:** Waxaad u qalmi kartaa daryeelka ilmaha oo jaban ama bilash ah oo uu bixiyo barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha gobolka Washington. Waxaa heli kara qoysas ka badan intii hore, oo isku duwaan gelintu waxay u fududahay sida 1, 2, 3.

Hadii aad u qalanto, waxa aad bixin doontaa wax aan ka badnayn $165 bishii. Qoysaska qaar waxbaba ma bixiyaan.

Ku dalbo onleyn ama taleefanka. Booqo **www.dcyf.wa.gov/childcare** ama la hadal 844-626-8687. Caawimada waxaa lagu heli karaa taleefanka luuqado badan.

Faafi fariinta! U gudbi qoys aad taqaano.

### QORAALADA BARAHA BULSHADA

- Ma u baahan tahay kaalmo bixinta kharashka daryeelka ilmaha? Waxaad u qalmi kartaa daryeelka ilmaha oo jaban ama bilash ah oo uu bixiyo barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha gobolka Washington. Xog badan ka oggow oo dalbo maanta! **dcyf.wa.gov/childcare**
- Ma waxaa kugu adag in aad bixiso kharashyada daryeelka ilmaha? Kaligaa ma tihid! Barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha gobolka Washington waxay caawinayaan qoysaska Degmada [geli degmadaada halkan]. Oggow hadii aad u qalanto. Booqo **dcyf.wa.gov/childcare**
- Caruur in la koriyaa waa qaali, laakiin daryeelka ilmaha maaha inuu noqdo qaali! Eeg hadii qoyskaagu uu heli karo kaalmada bixinta daryeelka ilmaha maanta. Booqo **dcyf.wa.gov/childcare**
- Wadaagista waa danayn! Miyaad garanaysaa waalid isticmaali kara kaalmada kharashka daryeelka ilmaha? Ku taag garee ama u dir. **dcyf.wa.gov/childcare**
- Waxa aanu jecel nahay ka caawinta qoysaska helitaanka daryeelka ilmaha. Iminka aynu qoysas dheeraad ah caawino! Miyaa garanaysaa saaxiib ama jaar u baahan daryeelka ilmaha oo jaban ama bilaash ah? Tan u gudbi oo gacan ka gayso faafinta!



Washington State Department of
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

*Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION EL_0098 SM (05-2025) Somali